## WAXA NAGU SOO FOOL LEH

Dilka argagaxa ee lamafilaanka ee ku dhaca qof qoyska ka tirsan ama qof xabiib ah waa mid ka mid ah dhibaatooyinka qofka soo gaara kuwaaso laga yaabo in ay furaan xalaado ba'an. Dhibbanayaasha waxaa dhici karta qofka tiiranyada dhimashada qof xaabib ah kaddib ay jaahwareer galiso kuna abuurto cuqdadda dembiga, iyo xitaa wixii dembi ku oogid ee xigta.

Ma jirto wadda sax ah ama mid qalad ah ee sababaya dareemka qof xigto ah ee la dilay ama la khaarijiyay. Dhibbanayaasha waxaa soo koraya culeys leh jaahwareer, wax an loo dulqaadan karin, cabsi, eed, iyo welwel aan horey loo arag, ama in ay yeelan karaan dareen qiiro amuusnaan sababta. Dareennada noocaas ah waa kuwo caadi ah ee dhaca maalmaha, toddobaadyada, iyo bilaha xiga dilka, iyo xallinta marxaladahaan adag iyo dulqaadka loo baahanyahay in la aqbalo waxa dhacay waxa ay noqon mid jiitanta oo waqti qaadanaysa. Oggolaashaha taageerada dadka kale iyo dadaalka laga raadinayo tageero dheeraad ah dadka arrimo noocan ay la soo gudboonaatay iyo la-taliyeyaal xirfado leh waxaa dhici in ay ku caawiso dajinta qiirada arrinkaan.

Nidaamka garsoorka dembiga kaddib marka uu dil dhaco waxaa dhici karta in uu ahaado mid jaahawareer leh, adag, iyo aad u dhibaysa dhibbanayaasha, siiba marka ay dareemaan in ay waxba ka qaban karin. Baaritannada badankood ma sababaan soo xiritaanno, xukun qaadistuna badanaa ma ka sababto dembi ku caddayn, dambi ku caddayntana ma keento xukun daawo u noqonaysa dhibka meesha ka dhacay. Inkastoo dhibbanayaal badan ay filayaan in go'aan degdeg ah laga gaaro kiisaska dilka, xaqiiqada waxa ay tahay in kiisaska dilka in ay qaataan bilooyin badan ama xita sanado badan si go'aan looga gaaro.

Inkastoo warbaahinta ay mararka qaarkood tahay wax la soo dhaweeyo, haddana wax lala yaabo maaha in xubnaha reerka ay mar labaad la sii dhibaateeyo haddii warbaahintu ay dhawriweydo xudduudaha, faafiso macluumaad aan dhab ahayn, dhibbanaha u samayso waji uusan lahayn, amaba ay gebihaamba ismoogeysiiso in ay dembiga tebiso. Khubarada dhibbanaha caawiya ama baara kiiska waxa ay ku talin karaan siyaabooyin looga hortago arrimaha warbaahintaquseeya.

## GARGAARKA DHAQAALAHA

Guddiga Magdhayga Dhibbanayaasha Dembiga ee Minnesota waxa ay ka caawin karaa in uu fududeeyo culeyska dhaqaalaha ee xubnaha qoyska soo foodsaara ee ka yimid dembiga ba'an. Haddii qof qoyskaaga ka tirsan uu u dhintay fal dil ah, waxa aad mudnaansho u yeelan kartaa gargaarka dhaqaalaha ee la xariira falka dembiga ama dhaqaalaha dakhliga soo gali jiray ee lagu waayo sabab geerida qof qoyska masruufayay.

**Guddiga Magdhawga** waxa uu bixin karaa kharashyada soo socda:

- Kharashka duugta iyo aaska ama gubidda qof dhintay
- Nadaafadda kobta dembiga
- Adeegyada latalinta
- Masruufka la waayay
- Mushaarka la waayay
- Daryeelka caruurta
- Kharashka caafimaadka

Dacwadda nacfiga waxaa codsan kara:

- Xubin qoyska ama dadka marxuunka ku tiirsanaa, ama dadka uu marxuunku ka dardaarmay.
- Qof kharashka adeegyada siinayay dhibbanayaasha haray qayb ka bixiyay.
- Illaaliyaha, masuul maxkamad magacawday, waliga, ama walkiilka rasmiga ee ee dhibanayaasha ka haray marxuunka.
- Maragyada dembiga.

Guddiga Magdhawga waxa ay bixin karaan kharashka uusan caymiska caafimaadka ama caymiska gaariga bixin ama ilaha kale ee dhaqaalaha (aysan ku jirin caymiska nolosha). U qalmiddaada kuma xirna dakhliga, waxaana jira xudduudo loo sameeyay nacfiyada qaarkood.

Guddiga Magdhawga la soo xariir si aad uga codsatid foomka dacwadda ama aad su'aalo ka qabtid nacfiga. Macluumaadka iyo foomka dacwadda waxaa kale ee laga helaa Shabakadda Internetka ee OJP Website.

**Guddiga Magdhawga Dhibbanayaasha Dembiga**
**651.201.7300 • 1.888.622.8799**
**ojp.dps.mn.gov**

## DHIBBANAYAASHA DEMBIGA XUQUUQ AYAY LEEYIHIIN

Sida uu qorayo sharciga Minnesota, xubin qoyska ah, ilaali-yaha, ama xaafidka marxuunka dhintay waxaa loo yaqaana "dhibbanaha dembiga" waxuuna sheegan karaan lahaanshaha xuquuqda dhibbanaha dembiga.

Dhibbanayaasha waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka dalbadaan gargaarka dhaqaalaha (magdhawga) gobolka haddii ay khasaaro dhaqaale uu falka dembiga sababay.

Dhibbanayaasha iyo marqaatiyada waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka codsadaan hay'adda adkaynta sharciga ee wax baaraysa in ay dadweynaha ka qariso aqoonsigooda.

Marka uu xukun dhaco, dhibbanayaasha waxa ay xaq u leeyi-hiin in:

- La wargeliyo iyo in ay ka qaybqaataan dacwadda socota.
- Ay maxkamadda ka codsadaan in ay eedeysanaha ku amarto in uu bixiyo wixii magdhaw ah haddii eedeysanaha dembiga lagu caddeeyo ama u qirto dembiga.
- Helaan meel ammaan leh oo dacwadda ay kala socdaan.
- Laga difaaco argoosasho ka imaanaysa shaqaaleeyaha marka dhibbanayaasha iyo marqaatiyada loo wacayo ka-maragfuridda iyo dhibbanayasha dembiga iyo xubanaha reerkooda ee waqtiga shaqada uga soo tagay si ay dacwadda ula socdaan.
- Ay goobjogayaal ka ahaadaan marka u dhacayo dhagaysiga xukunka ama qirashada.
- Ay cod ahaan ama qoraal ahaan ku diidaan heshiiska dembi qirashada ee dhagaysiga la horkeenay.
- Ay cod ahaan ama qoraal ahaan ku diidaan qaabka daacwadda lagu xallinayo ama xukunka.
- Ay maxkamadda la socodsiyaan saamaynta u dembiga ka soo gaaray ee cod ahaan ama qoraal ahaan inta uu dhagaysiga socdo.

### Xaaladaha falka dilka la xariira

Sida uu qorayo sharciga Minnesota, qofka si ulakac ah iyo dulmi ahaan u dila qof kale waxaa laga reebayaa in u dhaaqalo ka sameeyo dardaaranka, kabitaanka caymiska, ama heshiis uu cid kale kula galay dhimashada dhibbanaha.

Kaddib marka uu maxkamadda ka codsato qofka wakiilka rasmiga ah, maamulaha qaaska, ama qof daneeya, maxkamaddu waxa ay amri kartaa in uu eedeysanaha aanu gadi karin, burburin karin, ama waarejin karin hantida uu lahaa dhibaanaha geeriyooday

*Haddii aad tahay dhibbanaha ama marqaatiga dembiga iyo aad su'aalo ka qabtid xuquuqdaada ama aad rumeysantahay in xuquuqdaada la jabiyay, wac **Unugga Garsoorka Dhibbanaha Dembiga** (Crime Victim Justice Unit) 651.201.7310 • 1.800.247.0390 ext. 3*

*Dadka aan skakhsi ahaan la soo darsin geerida lama filaanka iyo argagaxa leh ee ku timid xubin qoyska ka tirsan ama qof xabiib ah weligood si buuxda uma garowsanayaan xanuunka dhabta ah iyo saamaynta dhibaataynta noocaan. Badanaa, dhibbanayaasha dembiga waxaa la soo gudboonaada xaalado qiiro adag leh iyo, mararka qaarkood, in ay xanuun ba'an ka qaadan taaso sababi karta in ay ku adkaato in ay nafsaddooda daryeelaan iyo dib ugu laabtaan noloshoodi caadiga ahayd. Waxaa muhiim ah in dhibbanayaasha ay xasuustaan in aysan kaligood ku ahayn iyo ay jiraan ilo iyo taalkulayn loodiiyaariyay.*

## SU'AALAHA CAADIGA

**Boliiska ma i soo wici doonaa?**

Baaraha ka socda hay'adda amniga ayaa dhici karta in uu kula socodsiyo hadba meesha ay wax marayaan, ama waxaa dhici karta in aad ka wardooni kartid meeshaa, hay'adda lagu weydiinayo su'aalaha iyo meesha ay wax marayaan.

**Ma qofbaa ii sheegi doona haddii dacwad la xareeyay?**

Haddii dacwad laga xareeyaya dembiilaha, degmada xeerilaaliyaheeda ee masuulka ka ah in uu dacwadda maamulo ayaa kula socodosiin doona adiga iyo dhibbanayaasha kale, caadi ahaan si qoraal ah, iyo idin siinaya ogaysiiska xuquuqda dhibbanayaasha dembiga. Si lagu hubsado in uu xeerilaaliyaha degmada uu magacaaga haysto, xeerilaaliyaha degmada xafiiskiisa la xariir.

**Sideen ku ogaan kara meesha ay wax marayaan kaddib marka eedeymaha dacwad xareeyay?**

Degmooyin badan waxa ay leeyihiin isuduwaha marqaatiga dhibbanaha ah ama u doode ee meesha u jooga in macluumaadka kiiska la xariira iyo gargaarka iyo taageerada la siinayo dhibbanayaasha illa iyo inta ay dacwaddu soconayso.

**Ma ku qasbanahay in aan maxkamadda tago?**

Haddii aad marqaatiga dembiga dhacay tahay ama aad aqoon u leedahay dembiga uu xeerilaalinta rabo in uu wax ka ogaado, waxa dhici karta in laguu soo diro warqadda wacitaanka si aad uga maragfurtid maxkamadda. Warqadda wacitaanka waa amar maxkamadeed ee kugu amraya in aad maxkamadda tagtid. Waxaa shardi ah oo keliya in aad maxkamadda tagtid marka laguu soo diray warqadda wacitaanka ee maragfuridda.

**Dhegaysiyada oo idil ma iska soo xaaridin karaa?**

Haa. Guud ahaana, maxkamadda dacwadda dembiga ee la xariirta eedaysane qaan gaarka ah waxa ay u furantahay dadweynaha. Garsooraha ayaa dacwadda ka dhigi mid dhagaysi xiran ama ku soo roga dhibbanaha ama maragfurka marka ay xaalado qaas ah jiraan. Dhibbanayaasha la xariira dembiilayaasha aan qaangaarin waxa ay ka qaybqaadan karaan dacwadda.

**Ma dhici kartaa in aan eego warbixinta boliiska qoray?**

Inta lagu jiro marxaladaha baaritaanka ama dacwad oogidda, warbixinta baaritaanka waa qarsoodi lamana siideyn doono. Dhibbanaha ayaa ka codsan kara xeerilaaliyaha in uu eego warbixinta baaritaanka, balse xeerilaaliyaha ayay u taaallaa in aan shaaca laga qaadin. Kaddib marka uu xeer-ilaaliyaah hubsado, faylka baaritaanka shaaca ayaa laga qaadayaa dabadeedna dhibbanaha koobi ayuu heli karaa.

**Sideen ku heli karaa koobiga baaraha caafimaadka?**

Wakiillada dhibbanaha dhintay dhulkiisa ama hantidiisa iyo dhibbanaha dhintay xubnaha qoyskiisa waxa ay heli karaan koobiga dhakhtarka warbixintiisa ayagoo codsi xafiiska u gudbiya.

## ILAHA

### Helitaanka taageerada

Dhibbanayaal badan ee falaka dilka waxa ay ogaadeen in faai'ido ku jirto in lala hadlo badbaadayaasha kale ee wax uga sheegi kara waaya-aragnimadooda. Macluumaad dheeraad ah ee ku taxluqa taaageerada badbaadeyaasha ee degaankaaga, fadlan la xariir:

**Parents of Murdered Children**
(Waalidka Caruurta La Dilay)
651-484-0336

**Survivor Resources** (Ilaha Badbaadaha)
St. Paul 651-266-5674 | Minneapolis 612-673-3951
U gurmashada xaalad degdeg ah, la tacaalka dareenka qiirada, iyo taageerada masuullada, caruurta, iyo dhallinyarada

**Mothers Against Drunk Driving** (Hooyooyinka La-Dagaallanka Darawaleynta Cabsan)
651-523-0802 or 800-487-6233

### Gargaarka dhibbanaha

Haddii aad dooneysid in lagaa caawiyo helitaanka magaca iyo lambarka ee barnaamijka taakukleynta dhibbanaha, fadlan la xariir Xafiiska Barnaamijyada Garsoorka: 800-247-0390, cvju.ojp@state.mn.us

### Marka dembiilaha uu xiranyahay

Si aad ku ogaatid haddii uu dembiilaha xiranyahay, ama aad ku codsatid ogaysiinta qofka xabsiga lagu hayo baddallada xaaladdiisa, ay ku jirto wareejinta ama siideynta, isticmaal adeegyada Minnesota Vine.

**Minnesota Victim Information and Notification Everyday**
Macluumaadka iyo Ogaysiinta Maalin kasta ee Dhibbanaha Minnesota
1.877.MN4.VINE • 1.877.664.8463
www.vinelink.com

Haddii dembiilaha xabsi lagu xukumo, waxa aad codsan kartaa in lagula socodsiiyo isbaddallada ka jira xabsiga lagu hayo, ay ku jiraan wareejinta ama siidaynta, iyo si aad ku heshid macluumaad dheeraad ah ee dembiilaha quseeya ayadoo la isticmalayo adeegyada **Minnesota Haven**. Waxaa sii dheer, in Minnesota Department of Corrections (DOC-Waaxda Asluubta ee Minnesota) Victim Assistance (Taakulaynta Dhibbanaha) iyo Restorative Justice Program (Barnaamijka Baxnaanista Garsoorka) ay sinayaan gargaar dhibbanayaasha dembiilayaasha lagu hayo xabsiga DOC.

**651-361-7200 ama 800-657-3830**
**mn.gov/doc/victims**

Case number: ______________________

Badge Number: ______________________

After a Homicide -Somali

# DILKA KADDIB

## Caawinaadda marka qof qoyska ka tirsan uu noqdo dhibanaha dilka.



Xafiiska Barnaamijyada Caddaaladda Garsoorka
WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA

Office of Justice Programs
MINNESOTA DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY

After a Homicide - Somali.indd 2
8/20/2020 3:01:09 PM